TEVA

Respiratory

Somaliska

# Warbixin ku socota bukaanka lagu daaweeyo Braltus®




Braltus®
tiotropium

# Waa maxay sababta la iigu qoray daawada Braltus?

Dhakhtarkaaga ayaa daawo ahaan kuugu qoray Braltus si lagaaga khafiifiyo cilladaha cudurka halista ah ee sambabada COPD[1]. Braltus waa daawo sanka laga qaato oo ay ku jirto maaddada tiotropium. Braltus waxay kaa caawini kartaa wax ka qabadka cudurkaas iyo khafiifinta cilladihiisa.






**Tiotropium** waxay ka mid tahay daawooyinka ugu badan dunida oo dhakhtar u qoro in lagu daaweeyo cudurka halista ah ee sambabada COPD. Waxay daawadaasi u shaqeysaa hab ah in ay debciso oo ballaariso dhuumaha neefta si ay kuugu fududaato inaad neefsato.



**Horay dhakhtar ma kuugu qoray tiotropium oo kiniini ah?** Braltus waxaa ku jira maaddooyin la mid ah oo waxay qiyaasta laga qaato daawada tiotropium u dhigantaa daawadii aad horay u qaadan jirtey, laakiin hadda waxaad isticmaashaa qalab kale oo daawada neef ahaan loo jiido. Waxaa qalabkaas neefjiidashada loo isticmaalaa hab la mid ah - balse si fiican u akhriso qoraalka intaadan bilaabin isticmaalka Braltus. Kiniiniga Braltus ku isticmaal qalabka neefta lagu jiido ee Zonda oo qura.

# Sidee ayaan u isticmaalayaa daawada Braltus?

Sidaad u isticmaaleyso qalabkaas waxaa ku tusi doona dhakhtarkaaga , kalkaaliyaha caafimaadka ama shaqaalaha farmashiyaha, laakiin waxaa adiguna akhrisan kartaa buugga yar oo la socda daawada ama Fiidiyaha habka isticmaalka qalabkaas oo laga helo.
**www.medicininstruktioner.se**

# Immisa goor ayaan qaadanayaa daawadaan?

Qiyaasta lagula talinayo (dadka da'doodu ka bilaabato 18 sano) waa hal kiniini oo ah noocyada galka lagu liqo afar iyo labaatankii saacba mar. Laba goor sanka ka qaado (isla kiniinigaas) si aad u hubiso in galka kiniinigaasi maran yahay.

# Maxaan samayn haddii aan illaawo inaan qaato daawada?

Haddaad illowdo qaadashada qiyaastii maalintaas, waa inaad isla marka aad xasuusataba qaadatаa. Laakiin hal qiyaas maalintii waa kugu filan tahay. Laba qiyaas ha isku qaadan si aad u soo guddo qiyaas aad illowdey.

Haddaad dooneyso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sababta laguugu qoray daawada Braltus, waxaad kala xiriiri kartaa dhakhtarkaaga ama ka akhriso buugga daawada la socda.

30

**Soddonkii maalmoodba mar ayaa lagu siinayaa qalabka Zonda iyo kiniiniyada aad isticmaaleyso.**

# Braltus®
tiotropium

**Braltus®** (tiotropiumbromid), Daawo dhakhtar qur ahi qori karo. Isticmaalka: Tiotropium waxay caawintaa dadka qaba cudurka halista ah ee sambabada si ay neefsashadu ugu fududaato. **Digniino iyo taxadar:** La tasho dhakhtarka, shaqaalaha farmashiyaha ama kalkaaliyaha caafimaadka ka hor inta aadan bilaabin isticmaalka Braltus. Braltus waxaa loogu talagalay in cudurka sambabada oo aad qabto meeshiisa lagu hakiyo. Ma ahan daawo loo isticmaalayo neef-ku-dheg degdeg ah ama neefsasho xiiq ama hiinraag ah. Baakada: kiniiniyo ka samaysan gal budo ku jirto. **Dhab u akhriso qoraalka la socda inta aadan bilaabin isticmaalkeeda.**




**Teva Sweden AB**, Kungstorget 8, Box 1070, 251 10 Helsingborg.

Aug. 2018, SW/BRA/18/0013